

WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA  
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD. 2024

# JUQURAAFI



XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA



**Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha & Tacliinta Sare**

**Xafiiska Imtixaanaadka iyo Shahaadooyinka Qaranka**

**Imtixaanka Fasalka 4aad ee Dugsiga Sare**

**JUUNYO 2024**

**MAADDADA: Juquraafi**

**WAQTI: 2 SAACADOOD**

**FADLAN JAWAABAHA KU QOR BUUGGA JAWAABAHA:**

**QEYBTA 1AAD: Goobo gali xarfaha jawaabta saxda ah (20 dhibcood).**

1. SoomaaLiya waxay dhacdaa:  
b) Galbeedka qaaradda Afrika. t) Bariga qaaradda Afrika.  
j) Waqooyiga qaaradda Afrika. x) Bartamaha qaaradda Afrika.
2. Bedka gibil biyoodku waa:  
b) 81% dhulka dushiisa. t) 29% dhulka dushiisa.  
j) 19% dhulka dushiisa. x) 71% dhulka dushiisa.
3. Saamiga wax soo saarka saliidda ee qaaradda Afrika waa:  
b) 11% saliidda guud ee dunida. t) 21% saliidda guud ee dunida.  
j) 12% saliidda guud ee dunida. x) 10% saliidda guud ee dunida.
4. Qaaradda Afrika waxaa dhanka bari ka xiga:  
b) Badweynta Baasifiga. t) Badweynta Atlantkada.  
j) Badweynta Hindiya. x) Badda Madow.
5. Dalagyada saliidda laga soo saaro waxaa ka mid ah:  
b) Mesaggada. t) Sinsinta. j) Bariiska. x) Qamadiga.
6. Dalagyada ganacsiga loogu tala galay ee Afrika waxaa ka mid ah:  
b) Sarreynka. t) Bunka. j) Bariiska. x) Qamadiga.
7. Asalka erayga Juquraafi waa:  
b) Carabi. t) Roomaan. j) Gariig. x) Misri.
8. Webiga ugu dheer waa:  
b) Misisibi. t) Amazon. j) Niil. x) Furaat.
9. Cilmiga daraaseeya carrada iyo biyaha waa juqraafiga:  
b) Handasada. t) Warshadaha. j) Dhaqaalaha. x) Deeganka.
10. Aaladda Rikhtaraka waxaa loo adeegsadaa lasocodka:  
b) Dabeylaha. t) Heerkulka. j) Dhulgariirka. x) Roobka.





**QEYBTA 2AAD: ku beeg weedha qeybta (B) Midda ku haboon ee qeybta (T): (5 dhibcood).**

Tt	Magaaladda (B)	Lambar	Shaqada magaalada (T)
1	Dubay		Maamul
2	Hargeysa		Warshadeed
3	Tookiyo		Diimeed
4	Madiina		Waxbarasho
5	Oxford		Ganacsi

**Qeybta 3aad: Ka jawaab Su,aalaha soo socda: (75 dhibcood).**

1. Sheeg sababaha keena in ay dadku u hayaamaan magaaloooyinka (2 Dhibcood).
2. Sheeg waxa uu meeraha dhalku kaga duwanyahay meerayaasha kale (2 dhibcoo).
3. Kalasaar farqiga u dhaxeeya biyo gobaleed iyo biyaha caalamiga ah (3 Dhibcood).
4. Falanqee xiriirka ka dhaxeeya gumaysiga iyo dhibaatooyinka sohdinta siyaasadeed ( Dhibcood).
5. Faahfaahi waxyaabaha saameynta ku leh filiqsanaanta dadka (2dhibcood).
6. Sharraxaad ka bixi dhibaatooyinka ay daadadku u gaystaan deegaanka (2dhibcood).
7. Qeex waxa loola jeedo gobol dabiici ah (2dhibcood).
8. Caddee muhiimadda ay leedahay sohdinta badda (2dhibcood).
9. Sheeg laba kamid ah caqabadaha haysta tilmaamidda tirada dadka Soomaaliyeed (2dhibcood).
10. Qor Labo kamid ah ilaha dhaqaale ee dalka Soomaaliya (2dhibcood).
11. Ka dood caqabadaha haysta dhirta iyo xayawaannada dhulka Soomaaliya (3dhibcood).
12. Falanqee kaabayaasha aadanaha la xariira oo ay dowladdu ku taagantahay (3 Dhibcood).
13. Sheeg qaybaha uu ka kooban yahay gibilka noolaleyda (2dhibcood).
14. Caddee caqabadaha waaxda kalluumaysiga Soomaaliya (2dhibcood).
15. Sheeg magacyada labada dal ee ku muransan gobalka Kashmiir (2dhibcood).
16. Maxaa sababa abaaraha Dalka ku soo laablaabta? (3dhibcood).
17. Sababee ahmiyadda istaraatiiji ee qaaradda Afrika (2dhibcood).
18. Dulku waa meeraha sadaxaad marka loo eego fogaanta uu u jiro qorraxda kadib meerayaasha meerkoli iyo finos, hadaba hadii uu noqonlahaa meeraha koobaad ee fogaanta qorraxda ama meeraha shanaad ee dhawaanta qorraxda maxaa dhicilahaa? (2dhibcood).
19. Hadii uu udub dhexaadka dhulku ahaan lahaa mid qotoma maxa dhicilahaa? (2dhibcood).
20. Haday ammintu ( waqtiga) tahay magaalada Muqdisho ee dhacda dhigta 45 bariga Girinijka 8 subaxnimo soo saar amminta ( waqtiga ) magaalada Qaahira ee dhacda dhigta 30 isla bariga Girinijka (4dhibcood).
21. Cadee cawaamisha saameysa ( sitaban iyo sitagonba ) cimiladda Soomaaliya (2dhibcood).
22. Abaaraha iyo fatahaadaha isdaba joog ga ah ee Dalka ka dhaca waxay leeyihiin saameyn xun, cadee saameyntaa (2dhibcood).
23. Sidee loo xakameyn karaa dhibaatooyinka kadhaca fatahaadaha?(3dhibcood).



24. Soomaaliya markey xuroowday waxay qaaday Talaabooyin si ay u soo ceshato gobaladii ka maqnaa sida:- Soomaali galbeed, Jabuuti iyo Enefdii, sharaxaad ka bixi Talaabooyinkaas (3dhibcood).
25. Falanqee caqabadaha heysta dowladaha aan lahey bad (3dhibcood).
26. Soomaaliya waxay qaadatay Nidaamka federaaliga ah 2004.  
A) Waaku haboonyahay, Sababee (2dhibcood).  
B) Kuma haboono, Sababee (2dhibcood).
27. Sharraxaad ka bixi hannaanka Maamul ee madaxtooyada (2 Dhibcood)
28. Caddee muuqaallada oogada dhulka sare ee Soomaaliya (2dhibcood).
29. Ka dood caqabadaha haysta dhirta iyo xayawaannada dhulka Soomaaliya (2dhibcood).

**30-Ku muuji Khariidada Soomaaliya goballada soo socda halkay dhacaan (5 dhibcood).**

- 1- Gobolka Awdal.
- 2- Gobolka Bari
- 3- Gobolka Mudug.
- 4- Gobolka Sh/Dhexe.
- 5- Gobolka Gedo.

